Tallaalka xoojiyaha tallaalka mRNA (Pfizer/BioNTech, Moderna)

Tallaalada mRNA waxay si wanaagsan kaaga illaalisaa cudurka covid-19 iyo isbitaal geynta. Waxay ku xirantahay da'da iyo nooca, illaalada uu bixiyo tallaalka hoos ayuu u dhici karaa waqti kadib. Illaalada ka imaaneyso dacwadaha iyo gudbinta fayraska hoos ayay ugu dhacdaa waqti kadib qof walba. Midaan waxay dhici kartaa wax badan ama ka yar si degdeg ah, waxay ku xirantahay nooca. Sababtaan darted waxaan ugula talineynaa qof walba laga bilaabo da'da 12 aad inuu qaato tallaalka xoojiyaha.

Waa maxay ujeedka tallaalka xoojiyaha?
Tallaalka xoojiyaha wuxuu xasuusiyaa difaaca jirka fayraska. Tan waxay soo celineysaa oo ay dheereyneysaa illaalada tallaalka kordhay.

Ku aadan cida loogula taliyay tallaalka xoojiyaha?
Xoojiyaha waxaa loogu talliyay qof walba oo da'da 12 iyo ka weyn.

- Dadka da'da 65 sanno iyo ka weyn
  Shaqsiyaadkaan xoojiyaha waxaa loogu talliyay kowdii inay siiso illaalada suurtogalka ah ee ugu wanaagsan ee COVID-19 daran oo u baahan isbitaal geyn. Si gaar ah ayaa loogu talliyay:
  - Dadka 75 sanno jirka iyo ka weyn;
  - Dadka 65 sanno jirka ah iyo ka weyn ee qabo cudurada raaga ee leh halista sareyso[1] ee cudurka Covid 19 ee daran;
  - Dagayaasha iyo helayaasha daryeelka ee guryaha xanaanada, guryaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha daryeelka maalinta ee loogu tallogalay waayeelka.
- Dadka da'da 16 illaa 64
  Dadka ka hooseeyo 65 sanno jirka xoojiyaha wuxuu kordhiyaa illaalada ku aadan caabuqa, jirada joogtada fudud oo marmarka ah iyo cawaaqiibaha (tusaale ahaan, saameynada muddada dheer ee COVID-19 iyo awood la'aanta shaqada). Waxay sidoo kale ku caawin kartaa inay si ku meelgaar ah u yareyso faafida fayraska. Tallada waxay quseysaa gaar ahaan:
  - Gaar ahaan dadka nugul ee ka hooseeyo 65 sanno jirka ee qabo cudurada raago oo leh halista ugu sareyso oo cudurkada daran ee Covid-19.
  - Dagayaasha iyo helayaasha daryeelka ka hooseeyo da'da 65 ee guryaha xanaanada, xarumaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha daryeelka maalinta ee loogu tallogalay waayeelka.
  - Shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo taabashada tooska ah ee bukaanka iyo daryeelayaasha dadka halista gaarka ah ku jiro.

  Tallaalka xoojiyaha ayaa sidoo kale loogula talliyay dumarka uurka ah laga bilaabo ee uurka iyo dumarka naasnuujinayo.
- Qaangaarka da'da u dhaxeyso 12 iyo 15
  Shaqsiyaadkaan xoojiyaha loogu talliyay haddii ay rabaan inay kordhiyaan illaaladooda caabuqa iyo jirada fudud oo ay yareeyaan halista ku faafinta xiriirada dhow (xubnaha qoyskooda).

Goorma ayuu tallaalka xoojiyaha la bixinayaa?
Tallaalka xoojiyaha ayaa lagu talliyay laga bilaabo 4 bilood kadib tallaalka aasaaska dhameystiran iyo tallaalka mRNA. Tallaalka aasaaska dhameysturan ayaa jirayo kadib

- labo garoojo oo tallaalka mRNA; ama
- Caabuq la xaqiijiyay oo fayraska koronaha + hal garoojo tallaal oo tallaalka mRNA ugu yaraan 4 isbuuc qeyb ah (iyada oo aan laga eegin isku xigga).

Haddii caabuqa fayraska koronaha la xaqiijiyo kadib markii la dhameystiro tallaalka koowaad ee tallaalka mRNA, kuwa xiggo ayaa quseeyo:

- Haddii caabuqa ku dhaco 4 bilood gudahood oo tallaalka aasaaska, tallaalka xoojiyaha ayaa lagu talliyay afar bilood caabuqaas kadib.
- Haddii ay dhacdo caabuqa ka badan 4 bilood tallaalka aasaaska kadib, tallaalka xoojiyaha ayaan caadi ahaan muhiim aheyn waqtigaan

Malahan tallaalka xoojiyaha waxaa loogu talliyay qaangaarada da'da 12 illaa 15 oo qabay caabuq oo 4 bilood tallaalka buuxo ee koowaad kadib.

Tallaalkee iyo garoojadee ayaa loo adeegsadaa tallaalka xoojiyaha?
Asal ahaan, isla tallaalka waa in loo adeegsadaa tallaalka xoojiyaha sida tallaalka aasaaska, haddii ay suurtogal tahay. Haddii tani aan la heli karin, tallaalka kale ee mRNA ayaa sidoo kale la isticmaali karaa. Haddii tallaalo ka duwan mRNA loo isticmaalay tallaalka aasaaska, xoojiyaha waxaa lagu bixin karaa mid ka mid ah labada tallaal.

Tallada waxaa loogu tallogalay tallaalka Pfizer/BioNTech oo loogu doorbidayo xoojiyayaasha kuwa da'da laga bilaabo 18 illaa 29. Tallada waxaa loogu tallogalay tallaalka Pfizer/BioNTech in loogu adeegsado xoojiyaha kuwa da'da 12 illaa 17.

Wixii tallaalka Pfizer/BioNTech, isla garoojada ayaa loo siiyaa xoojiyaha sida aasaaska tallaalida. Wixii tallaalka Moderna, bar ka mid ah garoojada waxaa la siiyaa tallaalka xoojiyaha.

Halkee ayaan ka heli karaa tallaalid?
Gobolka ayaa masuul ka ah tallaalka. Ka fiiri websaydka ama Qadka warbixinta ee degmadaada (www.foph-coronavirus.ch/cantons) si aad u ogaatid meesha aad iska diiwaangelin kartid oo aad tallaal ka heli kartid. Ama weydii dhaqtarkaaga, farmashiistahaaga ama farmashigaaga.

Warbixinta hartay waxay la mid tahay tallaalka xoojiyaha sida aasaaska tallaalida oo waxaa laga heli karaa xaanshida xaqiiqda *"Warbixinta guud ee tallaalka Covid-19 iyo tallaalka mRNA".*

[1] Jadwalka 2, bogga 11 ee tallada tallaalka mRNA: *Qeexitaannada cudurrada ee shakhsiyaadka halista ugu badan leh ee ay sababaan cudurrada daba-dheeraada (afka jarmalka)*